SR 99

99/S 272nd St ilaa Waddada Gobolka (State Route, SR) 516 Mashruuca Vic - Dhisidda Laami cusub iyo U hoggaansanaanta Xeerka Maraykanka ee Xuquuqda Naafada (Americans with Disabilities Act, ADA).

Sharaxaada Mashruuca

Macluumaad ku saabsan mashruuca Waaxda Gaadiidka Gobolka Washington (Washington State Department of Transportation, WSDOT) waxa uu qorsheynayaa mashruuca State Route (SR) 99/South 272nd Street ilaa SR 516 Vicinity – Paving and ADA Compliance ee Kent si loo wanaajiyo badbaadada, helitaanka, iyo fursadaha safarka qof walba.

Waxaanu qorsheynaynaa inaan dib u qodaano SR 99 laga bilaabo South 272nd Street ilaa agagaarka SR 516 oo aan cusbooneysiino laamiyada geesaha si ay uga badbaado iyo u fududaato dadka naafada ah.

Mashruucan waxa la qorsheeyey in la dhiso xagaaga 2026, waxaana taageeraya deeq dhan $1.45 milyan.

WSDOT waxa uu ka shaqaynayaa in la daro horumarinta ugu badan ee baaskiil wadayaasha iyo dadka lugeynaya intan lagu jiro, iyadoo horumarin mustaqbalka ah oo aan weli maalgelin la hayn la keeni karo mustaqbalka.

Qoraalka Badal ah: Khariidad muujinaysa khad oranji ah oo tilmaamaya goobta mashruuca ee SR 99 laga bilaabo South 272nd Street ilaa SR 516.

Horumarinta Ku Meel Gaarka ah

Qayb ka mid ah mashruucan, WSDOT waxa uu tixgelinayaa horumarinta ku meel gaarka ah ee la fulin karo inta lagu jiro qodista iyo dhismaha ADA. Kuwaas waxa ka mid ah horumarinta isgoysyada sida:

- **Yaraynta ballaca waddooyinka:** Yaraynta ballaca waddooyinka taraafikada ilaa 11 feet (3.35 mitir), iyadoo la ogolaanayo meel yar oo garabka bannaanka ah oo u dhaxaysa taraafikada iyo waddooyinka dadka, taas oo yaraynaysa heerka cadaadiska taraafikada ee dadka lugeynaya iyo baaskiil wadayaasha.
- **Meelo xawaaraha lagu yareeyo**: Rakibidda barkimooyinka xawaaraha waxay dhiirrigeliyaan gaadiidka inay gaabiyaan marka ay u soo dhowaadaan isgoysyo ama leexasho. Goobta la soo jeediyay ee barkin xawaare waxa ay ku taal S 272nd Street dhinaca galbeed halkaas oo baabuurtu u leexdaan dhinaca waqooyi ee SR 99.
- **Goobta gawaaridaa xamuulka:** Goobta gawaaridaa xamuulka wuxuu leeyahay qoor dheer oo la balaariyay goobaha qaar si loo yareeyo xawaaraha gaadiidka marka uu leexanayo isla markaana u oggolaado gaadiidka waaweyn inay ka gudbaan oo sameeyaan leexasho cidhiidhi ah. Tani waxay yaraysaa masaafada ay lugaynayaan dadka lugeynaya iyo baaskiil-wadayaasha.
- **Horumarinta dariiqa agaadiidka:** Horumarinta isgoysyadu waxay wax ka beddelaan waddooyinka dhinaca ee ka ballaadhan 50 feet oo leh qaab-gal/qaab-bixid.



Khariidad muujinaysa isgoysyada hadda jira ee la ilaaliyo iyo kuwa cusub/la soo jeediyay ee ku yaal SR 99

Isgoysyada Baaskiillada iyo Dadka Lugeynaya

Iyadoo korodh ku yimid baahida dadka lugeynaya, baaskiil-wadayaasha iyo gaadiidka dadweynaha ee SR 99, waxa la filayaa in baahida loo qabo hagaajinta isgoysyada iyo helitaanka ay sii kordhaan. Waxaa hadda jira toddoba calaamado taraafik oo ku yaal SR 99 inta u dhaxaysa South 272nd Street iyo SR 516 halkaas oo dadka lugeynaya iyo baaskiil-wadayaashu ay leeyihiin isgoysyo la ilaaliyo. Qaar ka mid ah isgoysyadu waxay leeyihiin masaafad aad u ballaadhan oo u dhaxaysa, ilaa saddex-meelood meel mayl. Waxaa jira laba isgoys oo cusub oo qorshaysan oo maalgeliyey magaalada Kent oo u dhow South 244th Street iyo South 248th Street. Hal isgoys oo dheeraad ah oo ku yaal South 268th Street ayaa qorshaysan laakiin hadda lama maalgelin. Fiiri khariidadda hoose.

Ikhtiyaarrada Dhismayaasha ee La Tixgelinayo

Aragti fog oo SR 99 ah, WSDOT waxay tixgelinaysaa dhowr nooc oo ka mid ah goobaha baaskiillada iyo dadka lugeynaya. Aragtiyahaaga waxay naga caawin doonaan inaan mudnaanta siino isku darka saxda ah. Waxaa jira saddex ikhtiyaar oo baaskiillo iyo dad lugeynaya ah oo la aqoonsaday SR 99:



Khariidad muujinaysa isgoysyada hadda jira ee la ilaaliyo iyo kuwa cusub/la soo jeediyay ee ku yaal SR 99

Wado La Wadaago: Waddo ballaadhan oo laamigan ah oo loogu talagalay dadka lugeynaya iyo baaskiil-wadayaasha, lagana soocay taraafikada gaadiidka.

Wadooyinka Baaskiillada iyo Jidadka Lugeynayaasha: Wadooyinka baaskiillada iyo jidadka lugeynayaashu waxay ku socdaan isku dhinac jihada gaadiidka, balse gaadiidka waa laga soocay.

Wadooyin Baaskiil Laba-jihada oo La Kala Soocay: Wado baaskiil laba-jihada oo la kala soocay oo ku yaal hal dhinac oo waddada ah, iyadoo jidad lugeynayaal ay ku yaalliin labada dhinac, dhammaantoodna laga soocay taraafikada gaadiidka.

Waxaan rabnaa inaan maqalno fikradahaaga!

Waaxda Gaadiidka Gobolka Washington (Washington State Department of Transportation, WSDOT) waxay rabtaa inay maqasho fikradahaaga ku saabsan sida loo fududayn karo in State Route 99/South 272nd Street ilaa SR 516 Vicinity qof walba uu si sahlan ugu isticmaali karo, haddii aad lugaynayso, baaskiil wadayso, kursiga curyaanka ku dhaqaaqayso, baska raacayso, ama gaadhi wadayso. **Si aad u gasho sahanka: http://bit.ly/41BB4oc ama iskaanno koodhka QR. Sahanku wuxuu xirnaanayaa 4 November. Dhammaan jawaabaha waa qarsoodi.**

Fadlan kala xidhiidh Amber Stanley wixii su'aalo ah Amber.Stanley@wsdot.wa.gov ama 206-817-8833.

Macluumaadka Xeerka Naafanimada Maraykanka (Americans with Disabilities Act, ADA)
Agabkan waxa lagu heli karaa qaab ka duwan adiga oo iimaylka ugu soo diraya Xafiiska Fursadaha Loo Simanyahay wsdotada@wsdot.wa.gov ama adoo ku wacaya lacag la'aan 855-362-4ADA (4232). Shakhsiyaadka maqalka laama maqalku ku adag yahay waxay samayn karaan codsi iyagoo wacaya Gudbinta Gobolka Washington (Washington State Relay) ee 711.

Ogaysiis Dadweyne ee Title VI
Waa xeerka Washington State Department of Transportation (WSDOT) si ay u xaqiijiso inaan qofna, iyadoo loo eegayo isirka, midab, ama wadanka u dhalasho, sida uu dhigayo Xeerka Xuquuqda Madaniga ee Title VI ee 1964 (Title VI of the Civil Rights Act of 1964), laga saarayo ka qaybgalka, loo diidi karo faa'iidooyinka, ama aan si kale loogu takoorin mid ka mid ah barnaamijyadeeda iyo hawlaha ay dawlada dhexe bixiso. Qof kasta oo aaminsan in xuquuqdiisa Title VI la jebiyay, wuxuu u gudbin karaa cabasho Xafiiska u Sinaanta Fursadaha (Office of Equal Opportunity, OEO) ee WSDOT. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan nidaamka cabashada Title VI iyo/ama macluumaadka ku saabsan waajibaadyadayada takoor la'aanta, fadlan kala xiriir Isku duwaha Title VI ee OEO 360-705-7090.